

Ballan qaad Tababar -qeexnaan: Caawinaadda Iilmahaaga xagga Akhriska iyo Fahamka

Promising Practices — Fluency: Helping Your Child Read and Understand — Somali version

Si uu u noqdo qof akhriska ku wanaagsan, ilmahaaga waa in uu labo shey mar wada fali karaa:

- 1) in uu kelmadaha bogga ku qoran fasiri karaa iyo
- 2) in uu fahmi karaa kelmadaha micnahooda.

Marka ugu horeysa ee ilmaha loo bilaabay in la baraa akhriska, waxaa xooga la saraa in la baro sida loo akhriya kelmadaha qura. Laakiin barashada akhrinta kelmadaha, ma aha xirfadda keliya uu ilmahaagu u baahan yahay. Markuu ilmahaagu ku wanaagsanaado in uu kelmadaha mid mid u akhriyo, waa in aad bartaa si sahlan oo aan hakad laheyn in uu wax u akhrin karaan.

Dadka sida qeexan wax u akhriya, kartidoodu waa dhaafsan tahay akhrinta kelmadaha keliya. Dadkaa waxey wax u akhriyaan si fudud oo sax ah. Waxey akhriyaan iyadooshacuurka muuqato. Iyagoo wax akhrinaya ayeey waxey awoodaan in ey u kala saaraan jumladaha kelmado la isu geeyay oo ku xoggan sida uu micnahoodu isu leeyahay. Waxey kaloo awoodaan iney mar qura wada akhriyaan kelmado kala soocan iyagoo fahmaya waxa ay akhrinayaan. Taasi waa himiladda ugu dambeysa ee qof akhris ka gaari kara.

Waa adagtahay in aad fahamto waxa aad akhriyeyso hadaadan aheyn qof akhriska ku qeexan. Culimada wax baarta waxey aaminsan yihiin, in qof walbaa leeyahay xad uu ugu dhug lahaan karo, markuu baranayo howl cusub. Dabadeed haduu ilmahaaga ku luminayo waqti badan in uu fahmo kelmadaha keliya, ma fahmayo akhriska good. Mar hadaad ku wanaagsanaato qeexidda kelmadaha, waxaad xoogga saari kartaa micnahooda. Dadka ku qeexan akhriska waxey ku istareexaan micnaha waxa ey akhrisanayaan. Waa ka gudbaan barashada sida wax loo akhriyo oo waxey u gudbaan in ey wax u akhriyaan si ey wax u bartaan.

Weydii macalinka heerka uu ilmahaaga ka marayao wax akhriska. Iilmahaaga waa iney billaabaan howsha u diyaarineysa in ay noqdaan kuwo akhriska ku qeexan, markey marayaan fasalka labaad ama sadexaad. Haduu ilmahaagu doonayo in uu noqdaa qof ku wanaagsan akhriska, waxaa jirta waxyaabo aad ku caawini karto.

Ku dhiira geli ilmahaaga in uu akhriska badiyo

Waxaa baaritaan lagu ogaaday, sida ugu wanaagsan ee lagu noqon karaa qof akhriska ku qeexan in ay tahay in aad akhriska badisaa. Si walba oo add ugu dhiira gelin karto in ilmahaaga waqti badan ku kharash gareeyo akhriska waxey ka caawineysaa inuu noqdo qof akhriska ku qeexan. In aad si kor ah wax ugu akhriso ilmaha iyagoo bogga eegaya waa u wanaagsan tahay. Mararka qaarkood ka xir codka telefishanka oo u sii daa halka hoose ee laga akhriya. Kula xiriir adigoo u khoraya kelmado sahlan. Iilmaha ilmaha ay ka akhris badan yihiin waa ka akhris wanaagsan yihiin. Mu'alaf ku noqo sida aad uga dhigi laheyd akhriska wax wanaagsan. Xasuusnow akhris walba haba yaraadee waa ka wanaagsan yahay akhris la'aan.

Akhriska qoraallo cusub ama dib u akhrinta qoraalo aad hore u akhrisay waxey kaa caawineysaa in aad noqoto qof ku qeexan.

Dadka wax baara waxey isku deyeen iney ogaadaan khoraallada ugu wanaagsan ee qofka ku caawinaya in uu noqdo qof akhriska ku qeexan. Qeexnaantu waxey ku xiran tahay waqtiga uu qofku ku kharash gareeyo akhriska. Kuma xirna in qofku akhrinayo qoraalo ku cusub iyo kuwa uu hore u akhriyey. U ogolow ilmaha haduu doonayo in uu dib u akhriyo buugga uu jecelyahay. Waxaa laga yaabaa in aad adiga ka helin, laakiin waxey iyaga ka caawineysaa in uu si qeexan wax u akhriyo.



Technical Assistance ALLIANCE
for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org

www.taalliance.org

Ha u akhriin keliya si kor ah ee la akhri ilmahaaga.

Waxaa baaris lagu ogaaday, adiga waalidka ah in aad u noqon karto ilmahaaga tusaalo wanaagsan oo akhriska ku qeexan. Si kor ah u wada akhriya adiga iyo ilmahaaga. Tani waxaa loo yaqaan caawinaada akhriska.

U ogolow in uu ilmahaaga doorto waxa uu jecelyahay in uu akhriyo. Marka hore, adiga u billaw akhriska isagana ha kaa daba yiraahdo. Farta ugu hay ama u tilmaan kelmadaha adoo ku dhawaaqaya. U akhri si fasiix ah oo shacuur leh. Ha boobin akhriska si uu ula socdo. Ku wada dhawaaqa kelmadaha aad akhrineysaan adigoo u tilmaamaya. U yeel haduu doonayo in uu keligii akhriyo. Ka caawi markaad aragto in uu kelmad la xarbinayo akhriskeeda. Si sax oo kor ah ugu dhawaaq kelmada ugu horeysa jumlada.

Habkan waxuu ka shaqeysiiyaa dareenno kala duwan: Ilmaha waxey mar keliya ka wada shaqeysiiyayaan dareenka aragtida, dareenka maqalka iyagoo isticmaalaya tilmaanta iyo hadalka. Haddii si joogto ah habkan loo isticmaalo, waxey ilmaha ka caawisaa in uu horey uga gaaro qeexnaanta akhriska. Inkastoo eysan la mid aheyn sida adoo qof la akhriinaya, ilmaha qaarkood waxaa faaido u ah in ey la aqriyaan cajalado lagu duubay qoraallada buuga ku qoran. Cajaladahan qoraallada buuga lagu duubay waxaad ka heli kartaa maktabadaha degmada.

Hab wanaagsan ee akhrinta qeexan waxaa ka mid ah barashada shacuurta lukhadda.

Adiga ama cajaladaha buugaagta laga soo duubay ayaa u noqon kara tusaalo akhri shacuur leh. Ilmahaaga dhageysiga ay dhageysanayaan akhri shacuur wanaagsan oo jaan go'an waxey ku baranayaan sida kelmadaha la isugu koobo jumlado micna leh. Xirfad wanaagsan oo cod jaan go'an ee isku si loo soo gooyay iyo shacuur loogu dhawaaqo leh, waxey ka caawisaa akhriyaha in uu fahmo kuna istareexo waxa uu akhriinayo.

Waalid ahaan, waad ku caawini kartaa ilmahaaga iney noqdaan kuwo akhriska ku wanaagsan. Waxaad ku gaari kartaa taa, in aad akhriska uga dhigto mid madaddaallo ah iyo in aad ku heraariso wax ey akhristaan. Xasuusnow ilmahaaga koritaanka akhriiskooda waa in uusan ku ekaan fasiridda kelmadaha bogga ku yaal, waa iney fahmi karaan waxaey akhriinayaan.

For more information —

Kuhn, M.R. & Stahl, S.A. (2000). Fluency: A Review of Developmental and Remedial Practices. CIERA Report #R2-008, Center for the Improvement of Early Reading Achievement.

Available in print from: CIERA/University of Michigan, School of Education, 610 E. University Ave., 1600 SEB, Ann Arbor, MI 48109, 734-647-6740 voice; Web site: www.ciera.org.

Available online at www.ciera.org/library/reports.

Additional References

Berliner, D.C. (1981). Academic learning time and reading achievement. In J.T. Guthrie (Ed.). *Comprehension and teaching: Research Reviews* (pp. 203-226). Newark, DE: International Reading Association.

Carbo, M. (1978). Teaching reading with talking books. *The Reading Teacher*, 32, 267-273.

Chall, J.S. (1996). *Stages of reading development* (2nd ed.). Fort Worth, TX: Harcourt-Brace.

Chomsky, C. (1978). When you still can't read in third grade after decoding, what? In S.J. Samuels (Ed.). *What research has to say about reading instruction* (pp. 13-30). Newark, DE: International Reading Association.

Dahl, P.R. (1979). An experimental program for teaching high speed word recognition and comprehension skills. In J.E. Button, T. Lovitt, & T. Rowland (Eds.), *Communications research in learning disabilities and mental retardation* (pp. 33-65). Baltimore, MD: University Park Press.

Heckelman, R.G., (1969). A neurological-impress method of remedial reading instruction. *Academic Therapy Quarterly*, 4(40), 277-282.

Heckelman, R.G. (1986). N.I.M. revisited. *Academic Therapy*, 21, 411-420.

Hollingsworth, P.M. (1978). An experimental approach to the impress method of teaching reading. *The Reading Teacher*, 31, 624-626.

LaBerge, D., & Samuels, S.J. (1974). Toward a theory of automatic information processing in reading. *Cognitive Psychology*, 6, 293-323.

Mathes, P.G., & Fuchs, L.S. (1993). Peer-mediated reading instruction in special education resource rooms. *Learning Disabilities Research and Practice*, 8, 233-243.

Perfetti, C.A. (1985). *Reading ability*. New York: Oxford University Press.

Samuela, S.J. (1979). The method of repeated readings. *The Reading Teacher*, 32, 403-408.

Stanovich, K.E. (1984). The interactive-compensatory model of individual differences in the development of reading fluency. *Reading Research Quarterly*, 16, 32-71.

Topping, K. (1987). Paired reading: A powerful technique for parent use. *The Reading Teacher*, 40, 608-614.

Young, A.R., Bowers, P.G., & MacKinnon, G.E. (1996). Effects of prosodic modeling and repeated reading on poor reader's fluency and comprehension. *Applied Psycholinguistics*, 17, 59-84.